



26 Ogost 2010

## **Qabyo Qoraalkii la Tashiga ee Dastuurka Soomaaliyeed**

### **ayaa loo soo Bandhigay Dadweynaha Soomaaliyeed**

Guddiga Madaxa Bannaan ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya ayaa maanta soo bandhigay Qabyo Qoraalka Dastuurka la Tashiga si loo geliyo la tashi dadweyne, waxana xaflado rasmi ah oo bandhigaa ah isku mar lagu qabtay Muqdisho, Gaalkacayada Galmudug iyo Garowe oo Puntland ah. Bandhigyadaa oo mid walba ay hoggaaminayeen xubno ka tirsan Guddiga Dastuurka, waxaa kale oo ka soo qayb galay wakiilo ka socda Dawladda Federaalka ah ee ku Meel Gaarka ah, Puntland iyo Galmudug Maamuladooda.

Guddiga Dastuurka oo ka kooban 29 xubnood, ayaa Axdigii Federaalka ku Meel Gaarka Soomaaliyeed ee 2004 u xilsaaray in ay soo diyaariyaan qabyo qoraalka dastuurkan si dadweynaha la tashi ahaan loogu gudbiyo. Guddiga Dastuurka, Dawladda ku Meel Gaarka ah iyo weliba hay'adaha iyo dawladaha iskaashigu ka dhixeyyo waxay dhammaantood rumeysan yihiin in diyaarinta dastuur cusub oo Soomaaliyeed oo loo dhan yahay, lagana wada qayb qaataa uu si weyn muhiim ugu yahay in dhidibada loo sii aaso nabad gelyada muddada dheer ee Soomaaliya.

Ujeedada la tashiga muddada labada bilood ihi, sidaa daraadeed, waxaa weeye in la qoro dastuur kama danbeys ah oo haysta taageerada, isla markaana ka tarjumaya, metelayana aragtiyaha dadweynaha Soomaaliyeed ee la xiriira nidaamyada dawladnimo, xuquuqaha iyo waajibaadka qarankooda. Guusha hawshani waxay si weyn ugu xirnaan doontaaka qayb galka dadweynaha iyo wada hadal dadka dhex mara. Si hawshaa loo meal mariyo waxaa bishan horaanteedii bilaabmay obole ballaaran oo ay wadaan qalabka warbaahinta oo la xiriira waxbarashada madaniga ah. Ololaha oo la tashigan dastuurka loogu tala galay wuxuu ku bilaabmay xayeesiisyo iyo barnaamijyo ka baxa idaacadaha iyo tilifishanka Soomaaliyeed. Guddigu waxay ku tala jiraan in ay soo bandhigto dastuur kama danbeys ah Diisambartan.

Kumaankun koobi oo Qabyo Qoraalka la Tashiga ee Dastuurka ah ayaa la daabacay si dadweynaha loogu qaybiyo, iyadoo qoraalkaa ay la socoto warbixin sharraxaad ah oo Guddigu soo saartay, iyo qoraalka kale oo ku saabsan Mawduucyada iyo Su'aalaha oo loogu tala galay in ay hagaan dadweynaha Soomaaliyeed oo u bayaamiyan mawduucyada waaweyn una suurageliyo in ay aragtoyahooda iyo faaladooda ku darsadaan dastuurka. Dhammaan dhokomantiyadaas oo dhan waxaad ka heli kartaa 'website'ka Guddiga Dastuurka: [www.dastuur.org](http://www.dastuur.org)

Bishii August 14keedii Wasiirka Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka ee Dawladda ku Meel Gaarka ah ee Soomaaliya, Mudane Madobe Nuunow Maxamed, iyo Raysal Wasaaraha TFG Mudane Cumar C/rashiid Cali Sharmarke ayaa la guudoonsiiyay 1,000kii koobi ee u horreeyay ee Qabyo Qoraalka, waxaan guudoonsiiyay Guddoomiyaha Guddiga Dastuurka C/llahi Xasan Jaamac, iyadoo ku tala galkuna ahaa in loo qaybiyo koobiyadaa Golaha Wasiirada iyo xubnaha Baarlamaanka Federaalka eek u Meel Gaarka ah si ay u eegaan uguna diyaar garoobaan bilowga la Tashiga Dadweynaha manta.

Taariikhdaa hore ee guudoonsiinta Qabyo Qoraalka, Raysal Wasaaruuhu wuxuu ku tilmaamay Qaby Qoraalkan la Tashiga ee Dastuurka fursad weyn oo u soo gacan gashay dadweynaha Soomaaliyeed, iyadoo dwdeynuhu ay qoranayaan dastuurkooda markii ugu horreysay tan iyo lixdankii. Dadweynaha ayeey jirtaa in ay ra'yiyo dheeraad ay ku darsadaan siina hagaajiyaan qabyo qoraalkan. Waxaynu aakhirataankii bilaabi karaa geeddi socod siyaasadeed oo dastuurka ka shidaal qaadanaya, rajadayaduna waa in arrintani horseedo dhammaadkii waqtiga kala guurka dawladnimo ee Soomaaliya.

Wixii warar ee dheeraad ah, fadlan waxaad ka eegtaa barta internetka ee Guddiga Dastuurka ee Madaxa Bannaan [www.dastuur.org](http://www.dastuur.org) ama kala xiriir Guddoomiyahaha Guddiga , Cabdullahi Xasan Jaamac 'e-mail': [info@dastuur.org](mailto:info@dastuur.org) ama tilifoon: **+254 721624425**.